


<p>Tucson Unified School District</p>  <p>UJEEDDADA GUDDIGA XUKUNKA</p>	CINWAAN UJEEDDO: Hubabka Dugsiga Dhexdiisa
	KOODHKA UJEEDDO: JICI
	WAAXDA HOGGAAN: Hoggaamminta Waxbarsho

Ardeyna ma qaadanayo ama ma lahaanayo hub ama wax la mid ah aagagga dugsiga dhexdooda iyada oo awood laga haysto mammulaha mooyee. Ardeyna isticmaalimaayo ama ugu hanjabi maayo hub ama wax la mid ah sidey khalkhal ugu ridi lahaayeen waxqabadyada Degmada.

Shaqaaale kasta oo arka qof hub ama wax u eg haysta aagagga dugsiga dhexdiisa ayaa isla markaaba wargalin doona arrintaas maammulaha dugsiga. Maammule dugsi oo arka ama hela warbixin ardey haysta hub aagagga dugsiga dhexdiisa ayaa isla markaaba qaadi doona tallaabooyinka ammaanka iyo ama edebta lagu toosinayo sida ujeeddooyinka degmadu fareyso, oo isla markaaba u wargalin doona xadgudbkaas ujeeddada sarkaalka nabadda iyada oo la raacaysa A.R.S.

Ardeyga ku xadgudbba ujeeddadan iyaga oo qaadanaya ama lahaada dabka la rido ayaa loo meeleyn barnaamij waxbarasho oo gaar ah ilaa muddo aan ka yareyn hal(1) sano, oo hakad lagag ridi waxbarashada muddo aan ka yareyn hal(1) sano, ama laga eryi dugsiga oon dib loogu oggolaaneyn hal-sano gudaheed muddo ah, hadday waligeed (sidaasi dhacdo).

Ardeyga ku xadgudba ujeeddadan, si kasta ha noqotee, oo ayna ku jirin qaadashada ama lahaanshaha dabka la rido ayaa lagu qaadi ciqaab edeb, oo ay ku jirto oo laakin aan ku xaddidneyn eryitaanku. Ciqaabta edebta ee lagu qaado ardeyga leh laxaad la'aanta ayaa loo eegi sal ahaan xaallad ka xaallad, sida ay fareyso Ujeeddooyinka Degmadu iyo sharciyada dawladda sare iyo ta dawladda gobaleedkuba.

Qeexitaanno

- **Hub** micnaheedu waa sida soo socota:
 - Dabka la ridoMiddi, oo aan ahayn middida jeebka ee laallaabanta oo afka birtu uuna ka dheereyn 2-1/2 inji oo aan la qufuli karin iyada oo furan.
 - Aalad wax baabi'is ah
 - Qalab khatar ah
- **Hub wax la mid ah** micnaheedu waa qalab la shaaca laga bixiyey ama laga dhigey sidii hubka.
- **Dabka la rido** micnaheedu waa sida soo socota:
 - Qalfoofka ama sheyga loo isticmaalo dabkan la ridoCod qariye ama aammusiye kasta ee dabka la rido.Wax kasta oo qarxa, dab daara, qiiq sunta ah, bam, qumbulad, gantaal leh qalab lagu lalin kara wax ka badan rubuc (1/4) wiiqiyadood, miino, ama aalado la mid ah.Qaybo kasta oo la isku biiriyo oo loo diyaarin karo rakibaadda dab la rido.**Aalad wax baabi'is ah** micnaheedu waa:
 - Aalad kasta ka sokow dabka la rido oo loo isticmaali karo, ama loogu talagaley, ama laga yaabe loo beddeli karo in laga gano qaab kasta oo loo

lalin karo ooy ka mid yihiin qoriqa BB/rassasta, wadhaf, qaanso, ama qaansada qaloocan.

- Qaybo kasta oo loo diyaarin karo marka la isku biiriyo rakibaadda dabka la rido.
- **Qalab khatar ah** micnaheedu waa wax kasta oo ka sokow dabka la rido, middida, ama aalad baabi'is leh oo ardey qaato ama lahaado sidii ay ugu isticmaalaan ama ugu diyaariyaan ugu isticmaalka u horseed dhmasho ma daawac halic oo jidhka ah.
- **Aagagga Dugsiga** micnaheedu waa dugsiga, dhulka dugsiga, basaska dugsiga, ama aagagga, dulalka, ama baabuurta loo isticmaalo ujeeddooyinka dugsiga ooy ku jiraan aagagga dhacdooyinka dugsigu soo abaabuley ay ka dhacayaan (tusaale haan, cayaaraha iyo baratanka isboortiga, baratanka muusikada, iwm.).
- **Hub Dilaa ah** micnaheedu waa hubka kasta oo loogu talagaley in loo isticmaalo dil, ooy ku jiraan dabka la rido.

La ansixiyey: July 12, 2005.

Dib looga shaqeeyey:

Dib loogu fiirsadey:

Sharci Tix-raac: A.R.S.

[15-841](#) Masu'uuliyadaha Ardeyda

[13-3102](#) Edeb xumida ku lug leh hubka

[15-342](#) Awoodaha aan xaddidneyn ee maskax la kaashiga ah

[15-843](#) Nidaamka ciqaabta anshax ee ardeyda

[13-3111](#) (Caarruuta) aan qaan gaadhka ahayn ee laga mamnuucay iney qaataan ama lahaadaan dabka la rido

[15-515](#) Waajibka loo leeyahay in wargalin laga sameeyo xadgudubyada ka dhaca aagagga dugsiga

[20 U.S.C. 7151](#) Uga baahnida goob qoryaha ka-xor ah

Iskaga-gudub Tix-raac: JI – Xuquuqda iyo Ardeyda Masu'uuliyadaha

JIC – Anshaxa Ardeyga

JIH – Su'aalo weydiin, Baadhitaano, iyo Xidhitaano

JK – Nidaamka Edebta Ardeyga

JKD – Waxbarsho ka Hakinta Ardeyga

JKE – Eryidda Ardeyga

Waxay beddeleysaa Ujeeddaada TUSD # Waxba